Washington State Department of Social & Health Services
Transforming lives

WORKING CONNECTIONS CHILD CARE (WCCC)
CHILD WELFARE CONTINUING CHILD CARE (CWCCC)

U-qalmitaanka CWCCC Warqada

CWCCC Eligibility Letter

LAMBARKA TELEEFOONKA XARUNTA XIRIIRKA ADEEGA MACAMIILKA	LAMBARKA FAAKISKA XARUNTA XIRIIRKA ADEEGA MACMIILKA
LAMBARKA AQOONSIGA MACMIILKA	TAARIIKHDA

☐ Daryeelka Ilmaha Xiriirada Shaqada

Adigu waxaad xaq u leedahay daryeelka ilmaha ee aan ahayn lacagta wada bixinta bilaha ah midaas oo bilaabanaysa: _____ oona dhammaanaysa _____.

☐ **Fadlan sheeg macluumaadka daryeel bixiyahaaga si aynu u oggolaano lacag bixinta. Waxaad ku bixin kartaa macluumaadkaasi tooska teleefoonka lambarkan 1-877-501-2233, sitoos ah internetka halkan** www.washingtonconnections.org**, ama si-shakhsi ah adiga oo taga xafiiska DSHS ee ku yaala deegaankaaga.**

Adigu waxaad mas'uul ka tahay in aad:

- Na siiso macluumaadka hadda ah si aynu u xadidno u qalmintaankaaga uguna u oggalaano si sax ah lacag bixinada daryeelka ilmaha.
- Dooratid daryeel bixiye rukhsadaysan oo kasoo baxaya shuruudaha WAC 110-15-0125 ama WAC 110-15-3750 oona sameeyo isku habbeynta daryeelka ilmahayga.
- Lashaqee hawsha muraajacada adkaynta tayada si aad u ahaatid qof u qalma Barnaamijyada Lacag Kabida Daryeelka Ilmaha. Waxaad noqonaysaa qof aanan u qalmin dheefaha CCSP kadib marka la joojiyo wada shaqayn la'aanta xaqiijinta tayada darteeda ah waxaadna ahaanaysaa qof aanan u qalmin illaa aad kasoo buuxisid shuruudaha xaqiijinta tayada. WAC 110-15-0030
- Lashaqee baaraha oggaanshaha xiliga hore ee been-abuurka (FRED). Haddii aad diidid in aad la shaqaysid (bixisid macluumaadka la codsaday) baaraha, midaasi waxay saamayn kartaa dheefahaaga.
- Qortid imaatinka ama kasoo qayb galka ilmahaaga adiga oo isticmaalaya nidaamka imaatinka eliktarooniga ah maalin walba oo ay yimaadaan daryeelka. Daryeel bixiyahaaga ayaa ku tusin kara sida arintaan loo sameeyo.

<u>Waxaa khasab kugu ah in aad soo sheegtid isbedelada dhaca</u>

- Gudaha shan (5) maalmood oo laga joogo bilaabashada daryeelka uu bilaabo daryeel bixiyaha ilmahaaga;
- Gudaha 10 maalmood oo laga joogo bedelida cinwaanka gurigaaga ama lambarka teleefoonkaaga;
  Adigu <u>lagaagama baahna</u> in aad soo sheegtid isbedeladan soo socda, laakiin in aad sidaasi samaysid waxay kordhin kartaa oggolaanshaha daryeelka la siiyo ilmahaaga.
- In aad u baahantahay saacado badan oo daryeelka ilmaha ah kuwaas oo ka badan inta hadda la oggolaaday;
- In qof usoo guuray ama ka guuray qoyskaaga.
  In lagu guuldaraysto in laga soo baxo mas'uuliyadahaan waxaa ka dhalan karta lacag bixin dheeraad ah ama dhammaynta ama joojinta dheefahaaga.

Xuquuqahaaga:

- Waxaa la iila dhaqmi doonaa si ixtiraam leh oona daacad ah ayada oo aan la eegaynin jinsiyadeyda, midabkayga, waxyaabaha siyaasadeed ee aan aaminsanahay, asalkayga dhallasho, diinteyda, da'deyda, nooca aan ahay, naafonimo ama meesha aan kudhashay.
- Waxaan ku haysan doonaa xadidaada u qalmida CCSP gudaha 30 maalmood oo laga joogo taariikhda codsigayga.
- Waxaa la iigu soo wargelinayaa, qaab qoraal ah, xuquuqahayga sharciga ah iyo masuuliyadaha laxiriira dheefaha Barnaamijyada Lacag Kabida Daryeelka Ilmaha.
- Macluumaadkayga waxaa lala wadaagi doonaa wakaalado kale marka looga baahdo dhinaca xeerarka dowlada ama gobolka.
- Waxaan ku heli doonaa oggaysiis qoran ugu yaraan 10 maalmood kahor inta aan gobolku samaynin isbedelo lagu yareynayo ama joojinayo dheefaha aan ka ahayn sida loogu sheegay gudaha WAC 110-15-0120.
- Waxaan codsan karaa dhagaysi maxkamad haddii aanan oggolaanin go'aanka la xiriira kiiskayga Barnaamijyada Lacag Kabida Daryeelka Ilmaha.
- Waxaan codsan karaa horjooge ama maamule si uu muraajaco ugu sameeyo go'aanka ama tallaabada saamaynaysa dheefahayga ayada oo aan midaasi saamaynin xaqayga aan u leeyahay dhagaysiga.
- Waxaan ku haysan karaa adeeg turjumaan hadalka ama turjumaan qoraalka ah gudaha wakhti xadidan ee macquul ah oona iigu fadhin wax lacag ah.
- Waxaan dooran karaa daryeel bixiyahayga intiiba uu daryeel bixiyuhu kasoo baxayo shuruudaha kujira WAC 110-15-0125.
- Waxaan codsan karaa baaraha oggaanshaha xiliga hore ee been abuurka ka ahaada dhinaca qaybta baaritaanka been-abuurka (DFI) in uu yimaado wakhti kale. Khasab iguma ahan in aan soo galiyo gurigayga baaraha. Codsigaan ma ahaan doono mid saameeya dheefahayga u qalmitaanka. Haddii aan diido in aan lashaqeeyo (bixin macluumaadka lacodsaday) baaraha, waxay saameyn kartaa dheefahayga.

Macluumaadka Koritaanka Ilmaha

Waxaad oggaan kartaa haddii ilmahaaga ama koritaanka ilmaha uu yahay mid wanaagsan ama haddii ay ayadu u baahantahay tababar yar oo dheeraad ah si ay diyaar ugu noqoto iskuulka. Si aad sidaan u samaysid, waxaad buuxin kartaa su'aalaha baaritaanka koritaanka ilmaha bilaashka ah adiga oo kasoo waca Khadka Marwalba Shaqeeya ee Caafimaadka Qoyska lambarkan 1-800-322-2588 ama gala bogga internetka Caawimaada Waalidka 123 http://www.parenthelp123.org/child-development/help-me-grow-washington si aad u oggaatid wax baddan oo arintaasi ku saabsan.

Oggaanshaha Daryeelka Ilmaha (Child Care Aware) waxay bilaash ku siisaa, macluumaad iyo wareejin aan eex-lahayn qoysaska raadinaya daryeel ilmo leh tayo-saraysa. Si aad ula soo xiriirtid Oggaanshaha Daryeelka Ilmaha (Child Care Aware) 1-800-446-1114 ama toos internetka uga gal halkan http://wa.childcareaware.org

Waxaad ka heli kartaa xaaladaha baaritaanka asalka daryeelka ilmaha rukhsadaysan, taariikhda rukhsada, warbixinada ilaalinta, luuqadaha lagu hadlo iyo wax kale oo baddan bogga internetka Baaritaanka Daryeelka Ilmaha halkan www.del.wa.gov/check.

Carruurtu waxay haystaan xaqa aadanaha ee aasaasiga ah ee ah in ay ammaan helaan. Hanjabaad xad gudub iyo dayicaad ah ee loo gaysto ammaanka ilmaha midaas oo gelinaysa khatar dhaawacyo jireed iyo dareen ah iyo xitaa dhimmasho. Haddii aad kashakisid in ilmaha uu yahay dhibane xad gudub ama dayicaad, kasoo wac DSHS teleefoonkeeda lacag la'aanta ah lambarkan 1-866-END-HARM (1-866-363-4276).

Xuquuqaha Dhagaysiga

Haddii aadan oggolayn go'aankan, waxaad codsan kartaa dhagaysi adiga oo laxiriira xafiiskan ama u qora warqad Office of Administrative Hearings, P O Box 42489, Olympia, WA 98507-2489. Waxaa khasab kugu ah in aad codsatid dhagaysigaaga:

- Marka ay tahay ama kahor taariikhda dhaqan galka uu dhaqan galayo ficilkan ama talaabadan ama wax aan ka badnayn 10 maalmood kadib marka aynu kuu soo dirno oggaysiiska talaabadan, haddii aad qaadatid dheefaha hadda oona doonaysid in ay kuusii socdaan, ama
- Gudaha 90 maalmood ee laga joogo taariikhda aad hesho warqadan.

Meesha dhageysiga, waxaad xaq u leedahay in aad nafsadaada matasho, in uu ku matalo qareen ama qof kale oo aad dooratid. Waxaad awoodi kartaa in aad heshid tallo sharciyeed lacag la'aan ah ama qof adiga ku matala adiga oo laxiriira xafiiska adeegaha sharciga ah.

Soo sheegida Isbedalada

Wac 1-877-501-2233 ama Faakis 1-888-338-7410
Si toos ah internetka uga gal: Washingtonconnection.org
Boosto: DSHS Contact Center
PO BOX 11699
TACOMA WA. 98411
Kudar Lambarka Aqoonsigaaga Macmiilka bogg kasta oo aad soo gudbisid.